



BILAABIDA JIDKA 827, JID KU CUSUB WAQOYIGA METRO!

Laga bilaabo Diseembar 6, 2025, Metro Transit waxay ku bilaabi doontaa adeega jid cusub oo basaska isticmaalaan - Jidka 827 - oo isku xidha magaalooyinka Anoka, Coon Rapids, Blaine, Fridley, iyo Minneapolis. Jidkan ay isticmaalaan baska maxaliga waxay beddeli doontaa Jidka 852 waxayna gaarsiin doontaa adeega koonfurta I-694 ee ku teedsan East River Rd. Fridley iyo agagaarka Marshall St. oo ku taalo Waqooyi-bari Minneapolis, hagaajinta jidka iyadoo la kordhinayo helitaanka iyo adeeg la isku halayn karo oo laga helo waqooyiga metro.

Basasku waxay socon doonaan saacad kasta mar adeegana waa la heli doonaa::

- Maalmaha Shaqada 5 a.m. - 10 p.m. (Safarradu waxay ku safri doonaan 30kii daqiiqaba mar koonfurta Foley Park & Ride inta u dhaxaysa 6 a.m. - 9 a.m. iyo inta u dhaxaysa 3 p.m. - 6 p.m.
- Maalmaha Sabtida 8 a.m. - 9 p.m.
- Maalmaha axadda wax adeeg ah lama bixiyo.

Guudmarka Adeega

As iyada oo qayb ka ah qorshaha Metro Transit ee looga soo guurayo gaadiidka tareenada Northstar iyadoona la guurayo adeeg baska oo la balaadhiyay, Jidka 827 waxa uu beddeli doonaa adeegga tareenka ee u dhexeeya Fridley iyo badhtamaha Minneapolis. Waxa kale oo ay horumarin doontaa isku xidhka u dhexeeya Anoka iyo faras-magaalaha Minneapolis, taasoo u oggolaanaysa macaamiil badan inay u safraan meelaha muhiimka ah, sida: Anoka County Technical College, Mercy Hospital-Coon Rapids campus, Anoka-Ramsey Community College, Northtown Transit Center, Foley Park & Ride, Fridley Park & Ride, iyo Northern Stacks industrial park, iyadoo la siinayo fursad cusub oo ay adeeg ku heli karaan deganayaasha, ganacsiyada maxaliga ah ee Minneapolis iyo goobaha cagaaran ee Marshall St. oo ku taalo NE Minneapolis.

Jidka 827 wuxuu ku xidhaa dhowr waddo oo caan ah oo ku yaalo Northtown Transit Center, oo ay ku jiraan jidadka 10, 25, 805, 824, 860, iyo Metro micro: aagga goobta Blaine. Waxa kale oo ay ku xidhaa jidadka muhiimka ah ee isku-goysyada waqooyi-bariga Minneapolis - jidadka 30 iyo 32 - iyadoo hagaajinaysaa marin u helkaaga iyo gudaha faras-magaalaha Minneapolis.

Ka fiiri dhinaca kale qariirada



Ma xiisaynaysaa inaad wax badan ka ogaato mashruucan? Waxaan jeclaan lahayn inaan fikirkaaga maqalno!

Ben Picone, Qorsheeyaha Gaadiidka

Benjamin.Picone@metrotransit.org

Sharon Ceron Espinosa, Kaaliyaha Iskuduwaha Wacyigelinta Bulshada

sharon.espinosa@metrotransit.org

ROUTE 827

